

Caawiyaha Caafimaadka Dhimirka ama Dareenka

Waxaad Ka Fekertaa Shaqo ah Daryeelid oo leh Mustaqbal

*Ku raaxeyso shaqo ah daryeelka
caafimaadka oo ah mid wax weyn
ka beddeleysa noloshada dadka*



Caawiyaha Caafimaadka Dhimirka ama Dareenka waa shaqaalaha daryeela bukaanka qaba xaalado ah maskaxda ama dareenkooda ama naafanimu, iyadoo raacaya tilmaamaha dhakhtarka ama shaqaalaha kale ee daryeelka caafimaadka. Dadka qabta shaqada noocan ah waxay gacan ka geystaan barnaamijyada baxnaaninta ama daawaynta, bukaanka ayey ku caawiyaan isdhexgalka bulshada, waxay u fududeeyaan hawlaha maalinlaha ah oo waxay bukaanka ku caawiyaan nadaafadda shakhsiga ah. Waxay la socdaan fayqabka jirka iyo dareenka ee bukaanka oo waxay u sheegaan maamulka. Shaqadan waxay noqon kartaa mid kugu fiican haddii aad ka hesho in aad ka caawiso dadka ka xanuunsan maskaxda ama dareenka ama ah naafada si ay u gaaraan yoolalka noloshooda.

SHAQOYINKA KALE EE LA MIDKA AH WAAJIBAADKA SHAQADAN: Kaaliyaha Barnaamijka isticmaalka Maandooriyaha, Khabiirka Taageerada Baarista, Khabiirka Taageerada Hawlaha Shaqaalaha, Mental Health Assistant (Kaaliyaha Caafimaadka Maskaxda ama MHA), iskuxiraha Caafimaadka Maskaxda, Takhasuslaha Caawinta Caafimaadka Maskaxda, Mental Health Technician (Caawiyaha Caafimaadka Maskaxda ama MHT), Shaqaalaha Caafimaadka Maskaxda, kaaliyaha Dhimirka, Dabiibaha Barnaamijka Madadaalada, Residential Aide (Kaaliyaha Bukaanka ama RA), La-taliyaha Amniga.

WAXBARASHO

Shahaadada dugsiga sare ama tan dadka waaweyn ayaa laga raba qofkii u shaqeynaya sidii Caawiyaha Caafimaadka Dhimirka ama Dareenka, laakiin waxaa jira waxyaabo ka reebban. Goobta shaqada weydii shaqaalaha ay rabaan marka ay kuugu yeeraan wareysiga shaqada

LEYSANKA SHAQADA

Ma jiraan wax leysan daryeela ah oo la isaga baahan yahay. Shaqooyinka qaarkood ayaa la iska rabi karaa leysanka darawalnimada. Goobta shaqada weydii shaqaalaha ay rabaan marka ay kuugu yeeraan wareysiga shaqada.

AQOONSIGA SHAQADA

Goobaha shaqada qaarkood waxay rabaan shahaado ah aqoonsi xirfadeed si loogu shaqeeyo. Goobta shaqada weydii shaqaalaha ay rabaan marka ay kuugu yeeraan wareysiga shaqada.

BAARITAANKA SHAQAALAHA

Dadka doonaya inay u shaqeeyaan sidii Caawiyaha Caafimaadka Dhimirka ama Dareenka waa in la soo baarto taariikhdooyin hore iyo dambiyada sida uu dhigayo sharciga gobolka.

AQOONTA LUUQADAH

Dadka hadda barta afka Ingiriiska ee ku hadla luuqado kale oo aan ahayn afka Ingiriiska waa ay qaban karaan shaqadan. Inta lagu jiro wareysiga shaqada, goobta shaqada weydii waxa ay rabaan iyo haddii ay u baahan yihiin luuqad aad ku hadli karto markaad shaqeyneyso.

KOBCINTA SHAKHSIYEED

Waxaa jira fursado ah kobcid shakhsiyeed ka dib marka uu qof yeesho khibrad badan oo ah Caawiyaha Caafimaadka Dhimirka ama Dareenka. Marmar ayey shaqadu bixineysaa kharashka tababarka aqoonsiga ee lagu helo lacagta badan. Weydiiso goobta shaqada fursadaha koboca shaqada inta lagu jiro wareysigaaga shaqada.

Caawiyaha Caafimaadka Dhimirka ama Dareenka

WAA SOCOTAA

MUSHAARKA

Dadka ah Caawiyaha Caafimaadka Dhimirka ama Dareenka ee Minnesota mushaarkoodu wuxuu ahaa \$14.90 illaa \$21.13 saacaddii bishii Maaj 2022. Mushaarku waxa uu ku saleysan yaha meesha looga nool yahay gobolka.

HAWLAHA SHAQADA MAALINTII

- In aad la macaamiisho bukaanka ama macaamiisha si aad ugu taageerto niyad ahaan.
- In aad bukaanada ama macaamiisha ku dhiirrigeliso xirfadaha nolosha adigoo tusaya dhexgalka wanaagsan ee bulshada.
- In aad bukaanka ama macaamiisha ku caawiso nadaafadda shakhsiga ah ama hawlaha nolol-maalmeedkooda.
- In aad la shaqeyso xirfadleyaasha caafimaadka si loo qorsheeyo ama loo dabiibayo dadka.

*Bal daawo fiidiyow ku
baxaya afka Ingiriiska
oo ku saabsan
waxa ay sameeyaan
Caawiyeyaasha
Caafimaadka Dhimirka
ama Dareenka.*



- In aad uruuriso macluumaadka bukaanka, xubnaha qoyska, ama xirfadleyaasha kale ee shaqada.
- In la isku tababar oo la isku tusaaleeyo xirfadaha daahsoon ee goobta shaqada, lebbiska habboon, nadaafadda shakhsi ahaaneed iyo hagaajinta timaha.

SIDA LOO HELO SHAQO AH CAAWIYAHA CAAFIMAADKA DHIMIRKA AMA DAREENKA

Kala hadal shaqaalaha xafiiska CareerForce ee goobta kuugu dhow:

- Booqo [CareerForceMN.com/locations](https://www.careerforcemn.com/locations)
- Soo garaac 651-259-7500

Toos ula xiriiir goobaha shaqada:

- Ka raadso shaqada [CareerForceMN.com/job-search](https://www.careerforcemn.com/job-search) Caawiyaha Caafimaadka Dhimirka ama Dareenka ama shaqooyinka kale ee shaqadan la mid ah sida ku qoran bogga 1aad

CareerForceMN.com/CaringCareer

651-259-7500 – Turjubaan ayaa loo diyaarinayaa qofkii naga soo socda